


**KU NOOLAASHAHA
NOLOSHA MASIXIYADDA**



Albert N Martin

**KU NOOLAASHAHA
NOLOSHA
MASIIXIYADDA**

Albert N Martin

Sidee baan ugu noolaan karnaa nolosha Masiixiyadda si waafaqsan? Su'aashn waa mid muhiim ah. Waxaa jira shey keliya oo Hubaal ah kuna salaysan Kitaabka oo aan ku heysano nolosh ka timaadda Masiix, laakiin waxaa igu waajibay weliba inoo caddeyso sidaan ugu noolaan lahayn nolol Masiixiyadeed. Qorshahayagu wuxuu ku fadhiyaa hortaada qaar ka mid xeererka ku noolaashaha nolosha Masiixiyadda iney tahay Saddex qaybood:

1. Waxaan jeclaan lahaa bayaan gaaban oo cilmiga barashada Ilaah ee Kitaabiga ah ee khuseysa nolosha Masiixiyadda. Qorshahayguna waa ceebla'aanta mid ka mid ah waxbaridda ama ka dhaadhicin si gaar ah mabda' – sida ugu wanaagsan iyo dareen kitaabi ku dheehan tahay.
2. Waxaan jeclaan lahaa inaan indhaha kuu furo, si aad uga hortagi karto adiga waxyaalaha ka geesta ah iyo aragtida khaldan ee been abuurka ah ee ku saabsan noloshaha Masiixiyadda. Qaar inaga mid ah inagana sida runta waxaan u rajayn lahaa iney helaan sida ay indhaha inoogu furmeen kolkii ugu horreysayba, waayo-aragnimada Masiixiyadda sanado badan bay inagu qaadataa raacdeynta bakeylaha weligeenna ma qaban karno. Waan eryanaa, waayo-aragnimaoooyinka xag maskaxeed iyo xag qalbiyeedba ee ku jirta rajada siday doontaba ha ahaatee, in taasi la sameeyo weeye. Waxaanu meeshaa ka heleynaa waxa ay tahay dhabtii in lagu noolaado sida waafaqsan nolosha Masiixiyadda. Laakiinse, wey ina qalbi jabineysaa.
3. Waxaan jeclaan lahaa inaan kaa daahiriyo/sifeeyo wax walba oo khalad u fahmid ah ama fikradda khaladka ee kaa heysta arrinta oo lagayaabo inaad ka heysato

waxyalaha ku saabsan nolosha Masiixiyadda. Taasoo laga yaabo ineysan ku farxinin waayo-aragnimadeeda, laakiin waa dantaada ta ugu muhiimsan ee ugu wanaagsan.

1. MA JIRO MID AH WAXWALBE FURE

Ma jiro mid waxwalba fure u ah, ku noolaashaha nolosha Masiixiyadda. Nooca waxbarasho ee maskaxda aan ku hayo sidan oo kale ayey u dhigantaa ama ay tahayba: Halkan waxaa jira qof Masiixi ahaa oo sanado badan ay haysatay niyad jab iyo walaac shiraaciina uu ka dalacsanaa, laakiinse, jaho wuu heli waayey, wuxuuna u muuqday inuu inyar ka garanayo halka ay dabaysha Ruuxa u siddo isaga, inkastoo shiraaciisa dallacsanaa, waxeyna u ekeyd daldaloolo iney ka buuxaan. Halka ay kuwa kale ee agagaarkiisa socda ay horumar ka samaynayaan wuxuu u ekaa mid taagan oo inaba aan dhaqaaqeyn.

Laakiin, maalin iyadoo shir lagu jiro, oo uu buug la akhrinayo, isagoo ku jira caabudaad mukhlisnimo oo u gaar ah isaga keligii ayaa waxaa u soo baxay oo uu ku yimid qoraal gaaban oo ku jira Qoraalka Qudduuska oo wax walba iyo xaalad kasta oo uu ku jiray wax ka bedelay. Tusaale ahaan, wuxuu akhriyey cutubka 15aad ee Injiilka sida Yooxanaa uu u qoray oo wax ka sheegay xidhiidhka ka dhaxeeya Masiixiyiinta iyo Masiixa iney la mid tahay xiriirka ay leedahay laanta canabka iyo geedkeeda ay ku taalo. Tani waa shididda nolosha Ruuxiyaddiisa, taasoo kor loogu qaaday gabi ahaan qorshe cusub oo ku saabsan xagga firfircoonidda Ruuxa. Godadaka shiraaciisiina wey kabmeen ama tolmeen, weyna buuxsameen, sababtaa awgeed. Wuuna ka soo kabsaday muddo yar oo lix bilood ku siman, halkii uu lix sanadood oo hore wax horumar ah uusan ka samaynin nolosha

Masiixiyadda. Deedna asxaabtiisii buu u sheegay furaha waxwalba fura ee nolosha Masiixiyadda iney tahay fahmidda cutubka 15aad ee Injiilka sida uu u qoray Yooxanaa. Wuxuuna ku qancay in haddii keliya kuwa kale ay fahmi doonaan xidhiidhka Masiix uu la leeyahay dadkiisa ay la mid tahay laanta ku taal geedka canabka sideeda oo kale, oo weliba waxay garan doonaan gebi ahaan qorshaha cusub ee nashaadka firfircoon ee Ruuxa oo dhab ahaantii khuseeya ku socodka Masiixiyadda, ama kol kale ka feker qof la lagdamaaya dembi dhib ku hujuuma oo si joogta ah uu ugu sujuudo oo la curyaamay qirasho, oo ay ku adag tahay ka bixidda dhooqada oo aysan dadka kalena ogeyn ama ka warqabin inuu hoos ku jiro, taayaradiisana ay adag tahay in kor loo soo qaado. Waxba kuma jabna in geydhka/marshada hoos loo riixo lana siiyo saliidda, oo si fudud bay isaga wareegayaan taayarada, oo kor buu u isticmaalayaa shidaalkiisa isagoo tamar cadhaysan ku bixinayo!

Sidey doontaba ha ahaatee, maalin shir kale uu ka soo qayb galay, oo isaga oo akhrinaya buug, ama isagoo ku jira cibadiisa mukhliska u gaarka ahayd, ayaa waxaa u soo baxay haddana cutubka 6aad ee waraqadii Rasuul Bawlos uu u qoray dadkii Rooma. Wuxuuna akhriyey midnimada Masiixa iney tahay dhammaan qofkii hore uu ahaa inuu la dhintay oo ku dhintay, oo ay guud ahaan noloshii hore lagula aasay qabrigii Ciise, oo uu iminka yahay qof cusub oo ku jira Ciise Masiix. Wuxuu isu arkaa in loogu yeedho isku xisaabin ama wax laga aaminsan yahay oo kale, oo ku nool iminka qof ka soo noolaaday dhimashada. Wuxuuna akhriyey Ereyadan ah ‘Dembiga idiinma talin doono;’ Isagana kuma hoos jiri boqortooyada sharciga, iyo xukunka cadaabta, iyo qiraalka dembiga, iyo dhammaan awooddaa isxisaabinta, wuxuuna ku dhex jiraa meertadaa tamarta leh ee wareegga giraanta nimcada. Maxaa dhacay dee? U qoondoynta

rumeysadka ee waxbaridda cutubka 6aad ee Rooma, taayaradeeda si dhakhsa ah bay uga baxaan dhiidhiga ama dhooqada hadba sidaad u taqaano. Darawalkii dhibaateysnaa wuxuu saaran yahay laami engegan, oo markuu geyrka rogana waxaa u bilaabanaya shaqada sheelaraaha saliidda siiya wuxuu bilaabayaa dhaqaaq deedna, qof walbaw oo uu la kulmo wuxuu ku odhanayaa, ‘War ma taqaanaa furaha waxwalba furaha u ah ee nolosha Masiixiyadda waxa uu yahay? Waa la helay, oo anigaa ka dhex helay cutubka cutubka 6aad ee kutubka Rooma’ Ma garanaysaan furaha waxwalba waxa uu yahay? Waa furaha furi doona albaab walba oo xidhan. Laakiin, ma jiro hal fure oo waxwalba fura oo ku saabsan ku noolaashaha nolosha Masiixiyadda. Meel gaar ah inoogama sheegin Kitaabka Qudduuska. Taas bedelkeeda wuxuu inagu siiyey inaga wareegga furaha ee ka dul lusha qayb qoraaleed walba oo ka tirsan Kitaabka Qudduuska. Rabbigeena wuxuu yidhi “Dadku waa inaanu kabis keliya ku noolaan,” Laakiin maxay tahay kelmad walba waxay ka soo baxday afka Ilaah. (Matayos 4:4). Waxaa laga soo xigtay (Kitaabka Sharciga Ku Soo Noqoshadiisa 8:3). Inaad Masiixi buuxo noqoto waxaad u baahan tahay Ereyga Ilaah oo buuxa, aysanna ay noqon lagayaabe waxwalba fure keliya. Dhowr qodob buu Bawlos tilmaamay oo ahaa: “Qorniin kastaa wuxuu ku ahaaday Ruuxa Ilaah oo waxtar buu u leeyahay waxbaridda iyo canaanshada, iyo hagaajinta, iyo xaqnimada; in ninka Ilaah uu ahaado mid dhan oo aad loogu diyaariyey shuqul kasta oo wanaagsan.” (2 Timatiyos 3:16-17). Qorniin kasta wuxuu inga dalbanayaa in nin walba iyo gabadh walba uu u ahaado mid dhan oo buuxa. Erey walbana wuxuu ku ahaaday Ruuxa Ilaah, oo Qorniin kastaa waxtar buu u leeyahay canaanshaha, hagaajinta, iyo edbinta xagga xaqnimada; in ninkaa Ilaah uu u ahaado mid dhan. Waxaan u baahanahay in Kitaabka Qudduuska oo dhan uu inaga dhigo inaga Masiixiyiin wada dhan xag walba.

Bal eeg sida ninka barakadaysan ugu qeexay Sabuuradda ugu horreysa. “Waxaa barakadaysan”– diidnimo ‘Ninka aan ku socon talada kuwa sharka leh’ Ma dooneysaa in lagu brakadeeyo? Laguma barakdayn doono haddii aad ku bixiso saacado badan daawashada telefishinkaaga, oo inta badan sheega ama ku talo bixiya waxyaalaha Ilaah ka geeska ah, si waadax ah ama si aan waadax ahaynba u tabiya waxyaalaha ka geeska ah Ilaah. Qofna horumarka nimcada kama samayn karo isagoo saacado fara badan ku luminaya daawashada dhalada telefishinka. ‘Talada kuwa sharka leh’ Xanta ayay ku shaac baxeen oo lagu yaqaanaa! Nimcada kuma koreysid mar haddii waxyaalahaas maskaxdaadu ka guuxeyso. ‘Waxaa barakadeysan ninkii aan ku socon talada kuwa sharka leh, oo aan istaagin jidka dembiilayaasha.’ Kolkaad si buuxda ugu qushuucdo ama ugu bogto noloshaada heesaha xiddigaha Rock Star, oo aad ka hesho faafintooda sarkhaansan, heesahooda ansha xumidu ay gasho maskaxdaada suuragal kuuma noqoneyso, oo kuma kori doontid nimcada haddii iyo haddii markaad ku socoto talada kuwa sharka leh ee aan istaagin jidka dembiilayaasha, ama aan kursi kula fariisan kuwa dadka xaqira ama ku jeesjeesa; halkii ay ku farxi lahaayeen waxa ku jira waxaa? Midka furaha weyn ah ee ku jira ku noolaashaha nolosha Masiixiyadda muxuu yahay? Taasi ma aha midka aan leeyaha! ‘Ninka barakadaysan isaga waxaa ka farxiya sharciga Rabbiga; Sidaas baan leeyahay gara’e, guud ahaan muujinta doonista Ilaah sida y tahay. Wuxuu si fiican uga fekeraa sharciga Ilaah ama uga baaraan degaa waxa uu yahay sharciga Ilaah maalin iyo habeenba. Wuxuuna ahaan doonaa sida geed lagu beeray durdurada biyaha wabiyada agtooda oo midhihiisa dhala xilligooda, oo aan caleentiisa weligeed aan engegin, oo wax alla wuxuu sameeyo wuu ku liibaani ama ku barwaaqoobi doonaa. Ma

jiro fure waxwalba fure u ah oo ku jira ku noolaashaha nolosha Masiixiyadda. Kaas oo loo arki karo mid kharibay asal ahaan dhismaha asaasiga u ah Kitaabka Qudduuska, gaar ahaan qaybta waraaqaha ee ku jira qaybta kutubka Axdiga Cusub.

Maxey tahay dhibaata ay Masiixiyiinta ay ku qabaan kutubka Axdiga Cusub? Lacala u soo qaado tusaalahan: Kaniisaddii ku taallay caasimadda Korintos xilligaa, waxaa ka jiray kala qaybsanaan; iyo dhibaato sino aad u xun; waxey qabeen su'aalo ku saabsan guurka iyo waxyaalo ku saabsan xoriyada qofka Masiixiga ah; Sidan iyo sidaa ma samayn karaa, ma la sameyn karaa sidaa, ma la aadi karaa meeshaa? Waxey qabeen oo ay is-weyddiinayeen su'aalo badan oo ku saabsan is-inkiraadooda iyo kuwa ku saabsan haddiyadaha Ruuxa. Haddiiba ay jirto fure wax walba fure u ah oo ay leedahay nolosha Masiixiyadda, Bawlos uma hayo xal inuu ka keeno furahaas, isagoo leh halkan waxaa jira nooc walba oo dhib ah oo ku haysta waa wuxuu leeyahay fure? Laakiin waxba ma uusan ka sheegin nooca sheygan. Waxaad u baahan tahay tallaal kaa difaaco kana hortago waxbariddan ku leh waxaa jira hal fure oo khuseeya nolosha Masiixiyadda. Ma jiro midna fure wax fure ah, inta damaca jidhkaaga iyo jidhkeyga uu jeclaanayo mid un inuu heysto!

2. LAGAMA BAXSAN KARO DHIBAATADA (XIISADDA)

Ma jirto meel looga baxsan karo dhibaatada ama xariga inagu giigan ee xiisadda kulul iyo khilaafka iska horimaadka ay ku nooshahay nolosha Masiixiyadda. Anigu kuma lihi nolosha Masiixiyadda oo idil waa dhibaato iyo iska horimaad iskhilaafsan. Nooca waxbaridda ee aan iskudayayo ayaa soo saarayso sida beenta iyo khiyaanooyinka jira ee inoo soo socda ku cad: Wuxuu ku soo xidhay middaa dheeraadka ah ee ka timid isagoo wax dheeraad sida. Shir lagu jiray ayuu ninkii martida hadalka ku qornaa la soo baxay qayb qoraaleed ka baxsan mowduucii laga hadlayey, waxeyna ahayd dabcan inuu ka hadlo waxyaalo ku saabsan Masiix, wuxuu ku noolaa noloshiisa tu toos inoo khuseysa inaga; Ama nolol badbaadinta Masiix, ama mid ahaanshaha haysashda nolosha. Deedna wacdiyahii, wuxuu soo bandhigay fikraddiisa ku saabsan nolosha Masiixiyadda, Sidanna wax ku dalbado: Adigu ma waxaad ka walwalsan tahay dareenka dhibaatada la lagdanka dembiga yar ee kuugu hadhsan? Miyaad ku daashay xarbiga salaadda iyo baryada dhexdeeda? Miyaad ka walaacsan tahay dagaalka ku heysta ee aad kula jirto fikirka daahinta iyo fekradaha hinaasaha iyo kibirka iyo masayrka iyo xaasidnimada? Ma ku daashay la hardanka dembiga iyo macsiyada? Jawaab celinta maxay tahay? Mid walba oo Masiixi ah meeshan buu fadhiyaa, afkooda inta badan galgacal weeye, iyagoo leh, “Ilaahow waad ogtahay inaan daalay, oo aan bixin karo waxwalba oon heysto, keliya maalin un inaan kari waayo la dagaalanka fahmid la’aanta wadnaha, burburinta maskaxda, iyo soo jiidashooyinka dembiga ee iiga imanaya wax la’aan iyo waxba.” Khudbad jeediyihii oo hadalkiisa sii wata ayaa yidhi

‘Haddii aad ku daasho dhibaatooyinka, walaaca isku dhaca; Haddii aad qaadi doontay tallaabooyin, haddaba Masiix ayaa si aad kuugu noolaan doono noloshiisa si toos ah adiga, taasi oo kaa xoreyn doono tacadiga dhibaatooyinkii iyo iska-hori-maadkii aad ku jirtay. Ruuxa ayaana kaa buuxsami doono, deedna kor buu kuu qaadi doonaa, oo dhibaatadaa iyo iskudhacaa wuxuu u ahaaday wixii ugu darnaa ee dano laga lahaa, iney u ahaadeen wixii ku soo maray oo idil ee wakhtigii dheeraa loo hagaajinayey sugnaanta qaabka aad ugu jirto dulqaadashada nolosha. Isla kolkaad dareento dhibaatada iyo iska horimaadka sababteedana waxay tahay nacam adigoo dibadda uga soo baxay noloshan weeye ee dib ugu noqday jidadkaadii hore. Iminka tani ma aha suurad ama muuqaal buunbuunis ah. Waxaa laga soo yeedhiyey bog ka dib bogga xiga. Ka dib buug buug kale. Iska jir buugaagtaas oo kale! Haddii aad si dhab ah u qaadatid, waxey kuu kaxaynaan axwaasha dunida ama waxyaalaha khuseeya ee aan runta ahayn ee khiyaaliga shakiga dunida ah. Maxaa caddeyn ama daliil u ah ee uu inaga siin karaa Ereyga Ilaah Qudhiisa?

1. Dhabta dabeeecadda/maanka dembiga oo ay weheliso dhiirrigelinteeda iyo xoogga camaladeeda ina dulsaaran inaga. Bal ka feker waxa uu rasuul Bawlos inooga sheegayo inaga: “Waayo, damaca jidhku waa ka gees ruuxa, ruuxana waa ka gees jidhka, maxaa yeelay, kuwanu waa kala gees, si aydaan u samayn waxyaalahaad dooneysaan.” (Galatiya 5:17). Bawlos horey uguma socon oo u odhan inuu jiro jidh kaamil ah, dhammaan aad ku heleyso dareenka caqligaaga dhibaatada iyo iska horimaadka. Wuxuu inoo sheegay ineeynaan u baahnayn ineysan dusha inaga haysanin ama uusan ina xukumin damaca jidhka; Laakiin ku socda ruuxa adiga kuma buuxin karto damacyada jidhka, laakiin meelna kuma

uusan odhan in dareenka caqligaaga damacyada jidhkaaga wuu diidi doonaa; oo ah meesha uu damaca jidhka uu ka geeska noqonayo ruuxa, waa meesha iska horimaadka/isku dhaca uu ka imanayo. Waxaan si buuxda u sugayaa wakhtiga caddeynayo fasiraadda ama sharxidda Rooma 7:14-15 oo waxaan ognahay inay qoraalka warqaddu tahay wax aad u wareerineyso isku dhaca maalinlaha ee qofka u soo saaro, ‘Markaan wanaag sameeyo – oo aan si quman farta ugu fiiqo qodobka meesha aan wanaagga ku sameeyo –‘ Waxaa iiga soo baxayo sharci kale oo ku jira qaybaha jidhkayga. Halka inta badan Ruuxiyadda i saameeyso, ololeyntaada ka ficil ahaan wuu ku xaqirayaa oo ehaanaddiisuu wataa, halka inta xoogga badan kuu siyaado waxaa jira mid kale oo iska dhigaya ama matalayo dembiga kuugu hadhay ee ka geesta ah taa iyada ah. Maalin mashquul ahayd ka dib fiidkeedii oo aad timid xaafaddaadii/aqalkaagii oo aad tidhi, “Hagaag, bal aan eego jariiradda Time wixii ay ka qortay maanta caalamka!” Ma dareemaysaa in xooggaa ku qabsaday oo uu ku jiro dembiga markii aad qorsheyneysay inaad sidan samayso? Weligeys sidaasoo kale ma samaynin! Laakiin imaatinka aqalka ka dib maalin mashquul badan, oo aad istidhi adiga qudhaada, Waxaan heystay daqiiqado yar oo kooban ee aan dunidan saaka wax ka ogaado; waxay ila tahay inaan bal yara fariisto si aan u akhriyo Kitaabka Qudduuska ugu yaraan nuso saacad, maxaa dhacay? Oo jugdii daalka oo idil baa kuugu soo kacday iyo daalkii oo maskaxdaada waxay kuugu tidhi, ‘Waan rumeysan la’ahay inaan daalay’quruuruxa waxaan jirin ee maskaxdaada iyo dareenkaaga oo dhan ee xagga ruux la’aanta oo aad ku fekertay ayaa xushmad tiray Ilaah inaad akhrisato Ereyga

ku dhahadhan maskaxdaada. Maxaa sababay sidaa? Waa dembiga kuugu jiro awgii. Markii aad telefoon aad ka qabatid mid ka mid ah saaxiibadaa, laga yaabee inaad daashid, laakiin ka dib intii aad hadlaysay ee shanta daqiiqadood ahayd digniinta maskaxdaada wey taagnayd oo carrabkaaguna wuxuu dhex jiidhayey oo socday qiyaasta ilaa hal mayl daqiiqadiiba! Laakiin inaad go'aansatid shan daqiiqadood oo salaad baryo ah. Maxaa dhici kara? Maskaxdaadu waa waxba yahay iyo burburin miidhan oo carrabkaaguna wuxuu dareemayaa nolol la'aan iyo sida qayb/jab hilib ah oo dusha ka soo laadlaaddo suuqa/ sariibadda hilibka lagu iibiyo oo kale! Ilaah wuxuu yidhi dembiga wuu kuugu jirayaa oo laguuguma soo dhaweyn doonno ilmaha maalinta aad ka gudubto wabiga oo aad gasho caasimadda nuurka dhalaala. Sababtaasina weeye sababta aan lagaaga fasaxeynin/deynin dhibaatada iyo isku dhaca ku jirta Masiixiyadda.

2. Sidaas oo kale, waxaa jira adduun aan nasanayn, gardaran oo dagaal badan oo ina dulsaaran inaga. Bawlos wuxuu inoo sheegaa “Ha u ekaanina dunida.” Rooma 12:2. J. B. Philips, si labaad buu mar kale u sheegay wax sax ah oo qabanaysa maskaxda Ruuxa ee ku jirta qayb qoraaleedkan: ‘Ha ku qasmina dunida’ Qaabka dunida waa nolol ku jirta gebi ahaan sidii loo qaabeeyey, oon ka maarmeyn Ilaahay. Waxeyna cadow ku tahay Ereyga Ilaah iyo sharciga, iyo heerarkiisa jiritaaneyd iyo aaraadiisa, garaadkiisa, dadkiisa, iyo falsafaddiisa. Gabi ahaan dunida ma dhasho dadnimada ka soo horjeedda Ilaah. Qoraalka Qudduuska wuxuu inoo faahfaahiyaa inuusan heshiis la sixiixan karin kuwa meeshaa laga soo bixiyey. Waa u dagaal joogta ah oo cadaadis ina saaran oo

inaga riixiya isku qasimid Ilaah diidnimada, ama Ilaah la'aanta. Waa xero dugaagnimo markii qofku uu ku fekeroficilo ka gees ah oo ka hor imanayo yeelidda qaynuunadiisa. Bal aannu nidhaahno maxay tahay xisaabteeda. Waa waxaad arkeyso, oo imisaa kuugu jirta akoontigaaga (keyd xisaabeedka bangigaaga) oo maxaad ku haysataa oogada jidhkaaga, oo maxaa idiin yaalla guryahiina iyo dhulalkiina iyo waxyaale kale. Ilaah wuxuu ku leeyahay taasi xisaab walba oo maal ah maxaad kaga haysataa xagga samada midda taalla. Wuxuu inoo sheegaa inaga xisaab walba oo qurux badan waxey ku qarsoon tahay qalbiga, oo middan dunida wey garanaysaa ineysan waxba ahayn dhammaanteed.

Halka inta badan dunida ay isticmaasho – hadba sida ay doonisteedu tahay – waa dagaal aan nasasho lahayn oo ah cadaadis dul saaran rumeystayaasha oo ay ku heeraarsan tahay dhibaato iyo iska hor-imaad. Sidaas daraadeed, Yooxanaa wuxuu qoray Ereydan: “Dunida iyo waxyaalaha dunida ku jira toona ha jeclaanina. Qof un haduu dunida jeclaado, jacaylka Aabbuhu kuma jiro isaga. Maxaa yeelay, waxa dunida ku jira oo dhan oo ah damaca jidhka, iyo damaca indhaha, faanka nolosha, xagga Aabbaha kama yimaadaan ee waxey ka yimaadaan xagga dunida. Dunidana wey idlaanaysaa, iyo damaceeduba; laakiin kan doonista Ilaah yeelaa wuu jirayaa weligiis.” (1 Yooxanaa 2:15-17)

Waxaa jira shey keliya oo iga cabsiiya aniga (Waxaan ahayd oday da'ah oo arkaya waxyaabaha dhacaya) ma sidan baa markaan dusha ka eego wajiyada dhalinyarada wiilal iyo gabdhaba, waxaan la yaabaa sida intooda badan iminka ugu muuqdaan cusbooneysiin, oo qaarkood u

xamaasadeynsan yihiin ama ugu hawoonayaan waxyaalaha ku saabsan doonista Ilaah ee tobankii sanadood wakhti ay u dhinteen si la mid ah duqowdi axwaashooda ruuxiyeed. Maxaa dhici kara haddaba? Ciise wuxuu yidhi kuwaa Ereyga maqla oo ku dhaca dhul soona saara abuur wanaagsan, laakiin abuurkaa markuu kor u soo baxo waxaa ceejiya caws duureed kale (Dhirta cawska ama Harama) Miyaad garan kartaa Ciise waxa micno ahaan uu ka leeyahay ama waxa ay u taagan tahay cawska iska soo baxay? Ka welwelidda dunida, iyo damaceeda waxyaalaha ku saabsan ayaa galay, oo wuxuu ceejiyaa Ereyga. Adduunyadana wey neceb tahay hab nololeedka ku suntan waxa ka soo horjeeda iyada, oo muujineysa ama ka turjumeysa dunida ineysan waxba ahayn oo ay idlaaneyso waxeeda oo idilba. Haddii aad heysato ama qabsato waxyaalaha dunida oo dhan wey ku lumineysaa dunidan. Oo haddii aadan ku nooleyn danaystinimo ee ay tahay saldhigga niyad ku heyntaada ama hamigaaga; Haddiise aad xiiso weyn u heyso in noloshaada uu xakameeyo Ciise Masiix oo uu dusha kaga soo shubayo qasdiga boqortooyadiisa oo lagu xisaabiyo oo uu ugu dambeynta ku siiyo maalka janada, deedna waxaad noqoneysaa qof si joogta ah uga cadheysiiya dunida oo aysan dunida weligeed ku dhici doonin ilaa aad adigu noqotid mid Ilaah ka furtay mooyaane. Haddii aad haysato diin kuugu filan oo kaa dhigto qof la ixtiraamo, dunida aad bay kuu jeclaaneysaa si ka badan sidii hore, Sababta oo ah waxaad u tahay taallo falsafeed. Ma jirto meel looga baxsan karo dhibaataada iyo isku dhacyada, si sahlan Rabbiyow ha iigu keenin dhibaataada? Waan karaa waxaanse leeyahay nus qarni oo aan noolaa, laba iyo soddon sanadood ee aan Masiixiga ahaa. Dagaalka labada

dhinac cadhadiisa ay holcaysay markii aan isdejiyo ay dhinaca danbe ku dhamaaneyso, halka aysan weligeed ka bilaabaneyn. John Bunyan wuu ku saxsanaa markii uu lahaa: ‘Nasasho uma jirto Rumeystayaasha ilaa ay ka gudbaan webiga mooyaane’.

3. Waxaa aad u jira wax badan oo xasuustii leh inuu jiro ibliiska dareen dhuuni leh oo dhakhso wax u cuna. Lama ilaabi karo sareysiinta soo saaridda Butros: “Feejignaada oo soo jeeda, waaayo cadowgiina ibliiska ahu sida libaaxa ayuu u wareegaa oo uu doondoonaa cid uu liqo” Maka daawataan dibadda beerta xayawaanka dugaaga lagu xareeyo (Zoo)? Maya! Isagu shaqo ayuu ku jiraa! Shaqadiisana waxey soo jiidataa dareenka isaga qudhiisa sow ma aha? Wuxuu ku socdaa waxyaalo ku saabsan doondoono kuwa isaga isleeyahay’ aayar qaniina oo isaga tagay calaamadda micida? Mana aha dhamaantood; si dhakhso ah ayuuna kuu cuni. Taasina waa sababta uu Yacquub u yidhi, “Hor joogsada ibliiska, wuu idinka carari doonaa”. (Yacquub 4:7). Sidaas oo kale waxaan heli karnaa qoraal uu qoray Bawlos. “Waayo, inaga lama lagdano bani’aadan, laakiinse waxaan la lagdannaa kuwa madaxda ah iyo kuwa amarka leh iyo taliyayaasha dunida gudcurka ah iyo ruuxyada sharka oo samooyinka ku jira.” (Efesos 6:12).

Bawlos ma uusan odhanin ilaa inta aad ka gaareyso ammaanta makhuurinta (Baptism) ee Ruuxa Qudduuska. Oo deedna dagaalka halkaas buu ku dhamaanayaa! Ama ilaa inta aad ka qayb galayso shirarka oo aad sirta ku jirta nolosha oo sidaas bay ku dhamaaneysaa! Maya! Haddii aad tahay Masiixi dhab ah oo ay ku taabatay xaqiiqda,

ibliiska dhakhsuu isugu dayayaa inuu ku cuno shaki la'aan.

4. Waxaan ku badbaadnay rajo. Waxaan badbaadnay macnaha iyo mowqifka ugu wanaagsan oo haddana yimid. Dhamaanteen iminka waa nagala saaray. Ogeysiinta sidee bay hawshan loo qabtay. Markii Ilaah shaqeeyey oo ay adigu kuugu dhamaatay. Maxay tahay sidaad u ekaan doonto? Sida ku cad Kitaabka Qudduuska wuxuu leeyahay “Waxaad u ekaanaysaa Ciise Masiix. Isagu wuxuu bedeli doonaa jidhkeena liita inuu u ekaado jidhkiisa ammaanta leh” (Filiboy 3:21). Waxaad heli doontaan Ruux, kaas oo u ekaaday sidiisii oo kale. Ilaah ma noqon doontid, laakiin xarigii ugu danbeeyey ee dabeecadda dembiga waa lagaa daahirin doonay, oo awoodda jidhka wuxuu u hoggaansami doonaa oo haddaba waxaad awood u yeelan doontaa inaad hesho jacayl saafi ah oo kuugu dhawrayo mug la abuurte. Bal ka feker taa iyada ah! Adigoo jidkaa ku socda oo aysan ahayn maalin un keliya, laakiin guulaha wakhtiga aadka u dheer ee aan la qiyaasi karin, soconayana oo aan ka baaba'ayn weligii fekerka ka nadiifinayana fikirka, fikradda masayrka! Ilaah wuxuu inoo calaamadeeyey noocyada daahirinta. Waxaanu leenahay maskax iyo ruuxa wasakh la'aanta jidhka ee dembigii jiray. Wuxuu awood u leeyahay inuu ka shaqeysiiyo oo uu addeeco qalbiga Qudduuska ah. Waad garanaysaan wakhtiyadii soo ahaaday markii Rabbigu gaar ahaan qiimihiisa ee u dhawaa, oo uu ku doonayayay inuu kaa xoreeyo “Jidhka dhintay” oo ay u khidmoodeen malaa'igihii. Saacadna fikirkaa ma uusan jabin kulankaa farxadda gelisay Isaga. Laakiin waxaa kuu soo baxaya wakhtigaa walaac ku

xadaya oo jidhkaaga u sugnaaday iyo iney jirto baabi'in iyo waxaan jirin oo waxba yahay ah. Xaqiiqduse waxay tahay laynagu calaamadeeyey daahirinta ku jirta jidhka iyo ruuxa, laakiin Ilaah inooma caleema saarin inuu ina siiyo nacam hagaajinta sax ah halkan iyo iminkaba. Haddaba waa maxay maxsuulka? Dhibaato! Sabata oo ah waxaan ku badbaadnay rajo, rajaduna weli lama xaqiijin, waxaa jirta dhibaato iyo isku hor-imaad. Bal qiyaas waxa ingu waajib ah inaan u ekaano oo uu gurigeenu ahaado meesha uu rasuul Bawlos uu joogay mid ka mid ahaa safarradiisii/socdaaladiisii. Haddii aynu si qarsoodi ah ugu joogi lahayn albaabka qol laga maqli karo baryadiisa, miyeysan cajiib ahaan lahayn inaan maqalno ducada rasuulka? Haa! Laakiinse ma garn kartaa siday u ekaan lahayd mararka qaar? Waxey ahaan lahayd inaad ka maqasho taah oo waxaad is odhan lahayd, qolkan ma aha qolkii Bawlos, ee waxaa iiga wanaagsan qol kale! Maya, waa Bawlos oo leh "Kuweena taambuugga ku jiraa weynu taahnaa, inagoo layna culeysiiyey" (2 Korintos 5:4). Waxaa jiray wakhtiyo markii uu taahayay, sababtoo ah qalbigaa qudduuska ahaa baa isu bedelayay nimcadii gubeysay naxariistii adeegga Masiix. Laakiinse isaga qudhiisa jidh buu lahaa: "Ninkaga dibadda waa kharibmayaa maalin walba maalinta ku xigta" (2 Korintos 2:16) oo isaga waa taahayay. Rooma cutubka 8aad waxey inoo sheegta waxyaalo la mid ah sidaas: "Uunka oo dhammu taahayo oo wada foolanayo ilaa haatan; iyaga keliyana ma aha, laakiin inaga waa sidaas oo kale, kuweenna haysta midhahii ugu horreeyey ee Ruuxa, xitaa inaga qudheennau dhexdeenna ayaynu ka taahnaa, inagoo sugeyno caruur noqoshadeena, taasuu waxaa weeyaan samata bixinta jidhkeenna" (Rooma 8:22). Codkaasi

wuxuu u ek yahay dhibaato iyo isku dhaca kala duwanaanta! Laakiin intaad ahaan lahayd saxiixe calaamadeed ee dahaadhka (frame) ruux la'aanta, waxaas oo idil way buuxiyeen. Waxaa jira taah iyo neef-tuurid ku calaamadaysan dhamaan cabsida Ilaah iyo caabudaadda Eebbe. Ma jirto meel looga baxsan karo dhibta. Haddii aad sidaas ku fekereyso, waa inaad heshaa baxsashadeeda taas iyada ah, xaqiiqdana kuma taaban.

(3) MA JIRTO XANIBAAD AWOODAHEENA MASKAXEED JOOJIN KARA

Ma jirto inkiraad ama xanibaad inaga haysata dareenkeena caqliyeed oo inoo qoray inaan ka shaqayno awood masaakxeed oo inaga furta bani'aadnimada ku jirta ku noolaasha nolosha Masiixiyadda. Waa maxay haddaba awood maskaxeedka ka samata-bixin karta qofka? Wuxuu leeyahay gacmahiisa, lugahiisa, indhahiisa, sankiisa, weliba garaadka caqliga awood maskaxeed – maskaxdiisa iyo xukunkiisa, laab la kicidda awooddiisa maskaxeed ee dhaqan- gasha camalkeeda, go'aan qaadashadiisa, doonistiisa. Wuxuu leeyahay ama haystaa hammuuntiisa, dareenkiisa, doonistiisa, iyo qaar kale oo ka mid ah falsafaddiisa jidh ahaaneydkiiisa ku lammaanan gudhihiisa xagga hoose ee qalbiga. Waxyaalahan oo idil waa awoodda maskaxeed ee bani'aadnimo. Markuu Ilaah soo cusbooneysiyo dembiilaha uu abuurtay Isaga ma heli karo awood maskaxeed oo cusub, ilaa uu ka dilo oo uu baabi'yo awooddii maskaxeed ee horay u jirtay. Nimcadana si

cajiib ah ay uga dhex shaqayso macal awooddeeda xoogga leh iney siiso qaybo cusub iyo mudnaan cusub oo ka dhex shaqeeya awoodda maskaxeed. Ilaahna kama noqonayo taasi dilid iyo inkirid dafiraadda wax walba oo ay leedahay awoodda maskaxeed ama abuuritaanka awood maskaxeed cusub. Waxaa laynoogu yeedhay inaanu ku noolaanno nolosha Masiixiyadda oo ku dhammaystiran isticmaalka ku dhaqanka maskaxeed iyo xukunka, awood u leh inaan si quman u fekerno iyo culeyska iyo ka baaraan degidda saameynteeda, dareenka, hamuunta, iyo rabitaanka niyadda loo hayo.

Maxay tahay haddaba waxbaridda aan doonayo inaan idiin soo saaro oo xeerarkeeda qodobeysan yihiin? Waxaa jira kuwa wax u baro sidaas oo Masiixiyiin ah intooda badan. Dhibkaaga haddii uu yahay sidaasi waxaad isku dayaysaa inaad ku noolaato nolosha Masiixiyadda, oo Ilaah inaba kutalagalkiisa inaad sidaas samayso, sida Ilaah weligii kaaga fileyn adiga inaad is-badbaadiso qudhaada. Adiga oo iska gudbinaya qudhaada xariiqda, kama aan filayo inaad ku noolaato nolosha Masiixiyadda. Waxa uu kaa filayo oo idil ee ah inaad samayso waxaa weeyaan inaad la socoto Ciise Masiix, kuna noolaato noloshiisa sida ugu haboon. Waxaan ugu yeedhay aragtida shooladda! Oo kuu sheegeysa adiga inaad tahay gebi ahaantaadaba wax cajiib ah, oo deedna Masiix uu kuugu shubay si toos ah adiga; kol labaad buu ku noolaan doonaa adiga dhexdaada oo ma jiri doonto xanibaad kale! Sababtuna waxay tahay ee aad ku heshay dee isku dhex yaacaas wareersan waa ta aad isticmaashid maskaxdaada iney meel dhex ku socoto. Waxaa kuugu waajib ah inaad isticmaalin taa iyada ah. Maskaxdaadu ha ahaato

mid caadi ah oo dhexdhexaad ah. Dhibaataadu waxaa weeyaan inay doonistaadu ay hesho jidhka, iminka inkraadda/diidnimada doonistaada iyo doonista Maiixa wey kuugu wada jiraan. Lagayaabee codkan inuu aad u yahay ruuxiyani, laakiin xaqiiqda waxay tahay waxbaridda Kitaabka Qudduuska waxaan ka doonayaa inaan diiradda saaro saddex waxyaalood oo gaar ah oo soo dedejinaya nooca ay tahay waxbaridda:

(1) Dheelitir la'aanta waxbarashadeed ee ka jirta Masiix

Waxaa jirta waxbarid cilmiyeed oo ku dhex jirta Masiixa ku jira Qoraalka Qudduuska: “Waxaa isku tallaabta laygula Masiixa, laakiin Masiixa ayaa igu dhex nool, nolosha aan haatan jidhka ku dhex noolyahay, waxaan ku dhex noolahay. Waxaan ku dhex noolahay rumeysadka xagga Wiilka Ilaah, kan jeclaaday oo naftiisa u bixiyey daraadey.” (Galatiya 3:20). Dad micne badan leh ayaa ereyadan u qaatay war-murtiyeed sida “Masiix inuu yahay nolosha.” (Kolosay 3:4). “Waxaan ku badbaadnay noloshiisii” (Rooma 5:10). Guud ahaan ogaansha la'aanta micnaha guud iyo is-shabihidda rumeysadka (Markhaatifurka buuxa ee Kitaabka Qudduuska). Waxay dibaddu uga soo wareejiya aaraada haysashada Masiix. Waxa ugu naxariista yar leh oo aan odhan karno waxaa weeye in waxbaridda ay tahay balaayo iyo hoog aan isu-dheelli tirneyn. Waa waxbaridda ku jiritaanka Masiixa ee kuu ahaatay, sida ku xusan qoraayadii sida Watchman – Nee, A.B Simpson, iyo Mrs. Hannah Whitehall Smith, runtii Masiix baa ugu dhex nool noloshaada si toos ah. Xitaa haddii la sii balaariyo inkiritaanka iyo xanibaadda fekraddaada, xukunkaaga, doonistaada, iyo saamayntaada; filsanaanta waasaca ah, oo waxay odhanayaan Masiixa wuxuu noloshiisa wey kuugu noolaan doontaa adiga.

(2) Dheeli-tirnaanta ka dhimista ka timaadda isu-ekaantayada nolosha Masiixa

Qaar ka mid ah waxbariddan waa wax ka soo dhambalmay awood siin la'aanta wax ka dhimidda u ekaanshaha is-shabihidda nolosha Masiixiyadda, nolosha ma mid kola ma kol kale sow la mid ma'aha xidhiidhka ka dhaxeeya laan caleen ah iyo geedkeeda canabka ay ku taalo oo kale? Haa, laakiin waa inaad ogaataa waxa sameeyey is-shaabahaaddaa? Waa sidii kiyaawe (fure) ka lumay qaybaha kale ee waxbaridda Kitaabka Qudduuska oo barashada cilmiga Ilaah laga soo saaray. Waxaan maqlay inay sidanna jirto. Imisa jeer baa weligaa ku dhex lugeysa goob dhir khudradeed ay ka baxdo oo markii wakhtiga sida buuxda ay u soo saaraan ubaxyada? Markii ay dadku gacanta kor u qaadaan, khudbad jeediyuhu wuxuu yidhaahdaa, iminka aan wax idin weyddiiyo. Waligaa ma aragtay geed shucuurtaada kiciyey markii uu horey soo saaray mirihii tufaaxa? Oo aad loo jeclaan karo quruxda laamaha yaryar ee ka soo lusha, meelaha ay iska haystaan dhudubka, oo ay si cad ugu soo muuqda miraha tufaaxa oo ay dhacaanka ka soo dareerayo muuqato, oo waxaas oo idil waa miraha raaxada ee ruuxa ka dhalan doona si sidaa la mid ah. Qaar kalana waxay sameeyaan ka jaris isu ekaanta kitaabiga ee kulmisay midnimada Masiixa geeridiisii, aasaddiisii, iyo sarakiciddiisii uu ka soo sarakacay geerida. Oo waxay ku leeyihiin, 'Miyaan la dhimanaya Masiixa?' Haddii aad qof mayd ah aad ku shubtid cadar adag agagaarka ka hooseysa sankiisa, wax ma urinayaa oo kuu jawaabayaa? Ilaama aha runtii! Sababta oo ah waa mayd oo horey buu u dhintay. Ama haddii ay jirto raashin si gaar ah uu u jeclaan markii uu noolaa, maydkaa ma urin

karaa? Mase kuu jawaabi karayaa? Ilaaha aha! Haddaba haddii aad la dhimatay Masiixa, dembiga runtii kaama jiri karo inuu ku dalbado. Waxaa jira awood siin la'aan iyo wax aan kitaabi ahayn ka jaristeeda ka imanaya isu ekaanta shaabahda nolosha Masiixiyadda.

(3) Waxbaridda aan saxd ahayn ee raaligelinta ama maqsuud ahaanshaha rumeysadka keliya

Sidan wax u ek bay u dhigan tahay waxbariddan. Haddii miyirkaaga dembiilanimu ee hor istaagta xukuumadda Ilaaha Qudduuska ah, oo aysan jirin meel kaloo u carartid, Ciise Masiix wuxuu kuu sheegay, inuu yahay Wiilka Ilaah ee dib u soo noolaaday ka jidh ahaan, ku noolaa nolol la mid ah nolosha aan ku nool nahay oo kale, ku dhintay geeri inoo qalanta ku dhimano, oo ku salaysan inaan ku noolaano nolol adeegid daahir ah oo ku quman adeegidda dhimashada iskutallaabta dusheeda, waxaa jira Ilaah xaq ah, xaqnimo kaamil ah, oo ay heli karaan dadka oo idil kuwii rumeyni doonay. Laga-yaabee inaan nidhaahno: Maxaad ku gaari kartaa xaqnimadan kaamilka ah? Si sahal ah baad u rumeysan kartaa. Gacmo madhnaanta rumeysadkaad qaadatay, iminka waxay leeyihiin, sidii oo kale Ciise Masiix xagga hore kaga jiraa raaligelinta. Maxaad u baahan tahay inaad samayso? Rumeysadku wuxuu u shaqeeyaa si la mid ah sida ay tahay raaligelintena ku timaadda xaqnimadeenna. Haddaba maxay tahay wax ka khaldan dhamaan kuwa aragtiyadan qaba, ee ay u heystaan wax laga siman yahay kassoo horjeedka xanibaadda iyo inkiraadda miyirka caqliga ku jira awwod maskaxeedka jidh ahaanayd ee laga soo samato bixiyo rag iyo dumarba?

(I) Waxay iska indha tiraan xaqiiqda ku jirta Qoraalka Kitaabka Qudduuska ee ku baaqaysa in awood siinta dhamaanteen ay tahay amaradii laynagu kaamil yeelay.

“Ka fikira waxyaalaha korka yaal” (Kolosay 3:2). Waa kuma ka kara inuu sameeyo sidaa – adiga mise Ilaah? Rabbi Ciise miyuusan odhan, “Haddii gacantaada midig ku xumeeyso, iska jar, oo iska tuur” waa inaad sidaa samayso! Bawlos wuxuu kuu sheegay isagoo leh sidatan, “Laakiin jidhkaan dhibaa oo aan addoon ka dhigaa si markaan qaar kale Injiilka ku wacdiyo aan qudheydu la ii diidin” (1 Korintos 9:27). Ma wuxuu Bawlos yidhi ku jiritaanka Ciise Masiix ayaa sidaa kuugu sameeyey? Maya! Waan dhibaa.....dib u bixiyaa.....qaybahaada sida aaladda xaqnimada –Xubnaha dembiga ha u siinina sida qalabka xaqdarada, laakiin Ilaah isa siiya sida qalabka xaqnimada. (Rooma 6:13). Waa inaad sidan samaysaa! Qaar kaloo badan baan idiin ka soo saari karaa awoodda maskaxeed ee jidhka iyo maskaxda ay inoo sheegeyso; Tusaale ahaan, “Ka fogow macsiyadda/sinada” Sideed uga fogaanaysaa ama ugaga cararaysaa macsida? Ilaah wuxuu ku yidhi iska diid sinada oo kaga carar cagahaada.

II. Dilidda jidhka waxay inagu tidhaahdaa iney mas'uuliyaddeena tahay Ruuxa.

Bawlos wuxuu yidhi “Haddii falimaha jidhka ruuxa ku dishaan, waad noolaan doontaan” (Rooma 8:13). Dhamaan Qoraalada Kitaab Qudduuska waa qoraal sax ah oo ina tusaya nimcooyinka

Masiixiyiinta waxa ay tahay mas'uuliydeena carada ka soo saareyso: Tusaale ahaan: “Sababtaas daraadeed, idinkoo idinkoo aad u dadaalaya, oo rumeysadkiina waxaad ku dartaan wanaag, wanaagiinana aqoon, aqoontiinana iscelin” (2 Butros 1:5). Aniga iyo adigaba waxaa ku cabiran saameynteeda, maskaxdeena wax walba ayaa dulsaaran; Kan yidhaahdaa, isagaan ku jiraa, waa inuu u socdaa siduu Isaga u socdo (1 Yooxanaa 2:6). “Waxaan ku soconaa Ruux”. (Galatiya 5:16). Waxaan raacnaa talaabooyinkiisa, oon soconaa (1 Butros 2:21). Waa aqoonyahanimo sax ah oo ay nimcada inaga dalbanayso inaan ku dhaqanno dhamaan awood maskaxeedkeena. Muuqaalka dheer ee ka muuqda sawirka Kitaabka Qudduuska ah ee nolosha Masiixiyiinta sawiraya waxaa weeyaan sida ta ciidanka, iyo oradyahanada oo kale. Middan waxaa lagu fasiri karaa tilmaanteeda qoraalo badan dhexdooda. Laakiin gaar ahaan haddii aan u soo qaadano mid ka mid ah waxbariddaa: “Haddaba gacaliyayaalow, xataa sidii aad weligiin u adeegi jirteen, iyadoo aan ahayn intii aan idinla joogay oo keliya, laakiinse haatan intaan idinka maqanahay si sidii hore aad uga sii badan badbaadadiina ku shaqeeya xagga doonista iyo xagga shuquladaba farxaddiisa wanaagsan aawadeed.” (Filiboy 2:12). Inta badan laga yaabee qoraalkan waa caawimaad buuxda oo ku jirta Kitaabka Qudduuska ee khuseysa mowduucan: Haddaba gacalilaayow, xitaa sidii aad weligiin u addeeci jirteen [Mana uusan odhan, xitaa sidii Masiixa idinkugu jiray ayaad weligii idin kugu noolaanayaa]. Iyadoon ahayn intii aan idinla jooga oo keliya, laakiinse haatan intaan inka maqanahay si sidii hore aad uga sii badan badbaadadiina ku shaqaysta cabsi iyo gariir, sababtoo ah kan idinka dhex shaqeeya xagga doonista iyo xagga shuqulkaba farxaddiisa wanaagsan aawadeed.

Waxbariddan waxay ina ogaysiineysaa gundhigga waxa uu yahay. Arrinta muhiimka ah ee meesha ku jirta waxa weeye: Ku shaqeyso badbaadada. Bawlos ma uusan odhan – “ku shaqeyso dadaal inaad ku gaartid”. Waa la cafiyey dadkani. Waa iney ku shaqeystaan hadalkaa la fahmi karo; dembi ku yeelashadiisa; Waxaa hor yaala tartanka badbaadada ku jirta Masiix. Oo ay taasi ku sameeyaan si cabsi iyo gariir leh, taas oo dareenka indhaha Ilaah ay eegeyso iyaga, oo ay xaqiiqdeedu dhab u tahay hawshaa khatarta ah. Sabab? “Waayo, waa Ilaah kan kaga dhex shaqeeya xagga doonista iyo xagga shuqulkaba farxaddiisa wanaagsan aawadeed.” (Aayadda 13). Ilaah ayaa inagaga dhex shaqeeya nimcada igu dhex jirta iyo doonista lagu sameyn karaba. Sababta oo ah Isagaa iga dhex shaqeeya oo sameeya waxa aan kaga dhex shaqeeyo badbaadadeyda oo ay la jirto cabsi iyo gariir.

Hagaag, Ilaah ma shaqeeyaa, mise aniga ayaa shaqeysta? Runtii shaqadiisa iyo shaqadaydu wey iswaafaqsan yihiin. Shaqadiisu waxey ku timaaddaa bayaanka shaqadeydu ay ku jirto oo caddeyneeyso shaqadiisa. Maad aragtaa quruxdeeda taasi?

Uma baahni inaan cabsado, waan shaqayn doonaa in badan halka uu Isagana iga dhex shaqeynayo. ‘Shaqadeena aan shaqaysano weligeed kama fiicnaan ama kama badin karto shaqada Ilaah uu inaga dhex qabto’. Qayb qoraaleed kale ayaa ku jirta Warqaddii Rasuul Bawlos u qoray dadkii Filiboy oo waxoogaa horumar ah ka smayneyso mowduucan; ‘Wax walba waan ku samayn karaa gargaarkiisa kan i xoogeeya’ (Filiboy 4:13). Bawlos wuxuu yidhi waa samayn karaa. Imisaad samayn kartaa Bawlosow? Wax walba oo idil; macnaha guud ee mowqifkan wax walba waxay ka turjumeysaa wax walba oo macquul ah oo ka jawaabaya deeqda Ilaah. Rasuulku wuxuu

leeyahay, ‘Wakhtigan doono oo wakhtigeeda kansho aan u helo. Mararka qaarna waa inaan wax ka barto waxa i farxad gelinayo markaan aad ugu baahanahay oo ay caloosheydu dhawaaq la ganuunacayso – mararka qaarna waan dharagsanaa, waxaan la yaabayse laga-yaabee xitaa inaan aniga ku sigtay inaan xariiqda xadka dhaafo u sii deynta raaxada nafta, sababta oo ah aad baa aly baraladeeyey! Laakiin waxa uu yidhi, in kastoon baranayo sidii aan qof darajada laga qaaday ama in badan ay ku jirto maanka Ilaah, wax walba waan samayn karaa.’ Waan ku samaynayaa tii Alla ee i xoogeysa aniga! Waxaa laygula qodbay iskutallaabta Masiix, si kastaba ha ahaatee waan ku noolahay, oo noloshayda iminka ku dhex noolahay jidhka ----‘waa kuma kan nolosha Bawlos ay ku dhex jirta jidhka – Masiix mise Bawlos? Deedna Bawlos sidan buu sameeyey. Laakiin jawaabtii uu inoo sheegay sidan bay ahayd “Waxaan ku noolahay rumeysadka ku jira Wiilka Ilaah oo ahaa kan i jeclaaday oo nafsaddiisa u bixiyey aniga daraadey”.

4. MA JIRTO KHIRAD DHIBAATOYIN

Ma jirto khibrad dhibaatooyin oo laynagla ballamay ama amar laynagu siiyey daruuriga qurub yar ee ku jirta ku noolaashaha nolosha Masiixiyadda.

Qaar ka mid ah waxbaridda nolosha Masiixiyiinta waxey caddeyneysaa in keliya heer hoose tahay khibradda Masiixiyiinta ee lagu xaqiiqsan karo qofka inuusan lahayn khibrad dhibaato ku daba xigta dib u noolaashiisa, ama ugu yaraan waxa daba xiga qirashadiisa iyo bilowga maanka caqligiisa Masiixiyadeed ee khibradeedna. Si kasta oo ay ahaataba, dhibaatooyinka khibradeed waa laba daraadle – amar iyo ballan qaad ku ahaatay

xagga Ilaah. Gelideeda tayeysan ee cabirka dhan kasta ah iyo heerka khibradda ruuxiyadda, xaqiiqda iyo xoogga. Taariikhda Kaniisadda sida ay qoreyso oo ku cad waxaa jiri jiray dun (xarigyo yaryar) oo dhuuban oo ay ku kala duwanaayeen ama isku khilaafsanaayeen culimada oo ku saabsan waxbaridda dhibaatooyinka. Taas oo loogu yeedho “heerka sare ebyoon/fiicnaanta Wesleyan” xoogana saarta fahamka gaar ahaan daahirnimada (Dambi ka saliidka karaameysan), oo ka hadlaysa makhuurinta ku sifeysa dabka, ama u imaanshaha jacaylka soocan. Xoogga ma saarto adeegga gudaha ama dareenka xagga gudaha qofka qalbigiisa, laakiin khibradda dhibaatooyinka ee awoodda ku jirta dembiga ayaa u ah dhamaan ka raacista dan kasta ama ugu daran iyo qorshaha dafiraadda. Wey igu filan tahay inta aan ka akhriyey heerka ebyan ee saree e Wesleyan. Cilmigiisa barashada Ilaah oo aan ogahay iney tahaya fikrado ka duwan waxa uu John Wesley qudhiisa ku fekeri jiray ee khuseysa mowduucan. Laakiin, qoraalka guud ahaan waa caqligalka sidatan, waan aaminsanahay, iney sax tahay matalidda habka gaboobay ee heerka sare, ebyanka Wesleyan inuu jiray dabadeed, sidaas oo kale waxaa jiray hab heer kale oo ka horreeyey oo la odhan jiray “Bentekolismkii hore” oo sharaxaya makhuurinta (Baptismka) ka Ruuxa Qudduuska, guud ahaan ku daba xigga ka dib qirashada qofka uu qirto Ciise Masiix inuu yahay badbaadiyahiisa, oo ma doorsoomo bayaankiisa guud ee ku hadalka carabka: sida aad u taqaanno taasi waa sida laguugu makhuuriyey (Babtiiska) ee awoodda leh taasi, marka uu kuu yimaado oo uu kuugu soo dego, waxaad ku hadlaysaa luqad aan la garanayn – waxay ay ugu yeedhaan afka qalaaad ‘Tongues’. Hab heerkii hore ee Bentikostalka micno wuxuu ahaa adeeg adag.

Midda saddexaad, waxaa jira mid casri ah ‘Dhaqdhaqaaqa Xamaasadaysan’ (Chrismatic Movement) wuxuuna la mid kii

nidaamkii hore ee Bentekolismkii heerka sare ahaa, waxaa jira macalimiin isticmaala qaybo qoraleed badan oo isku wada mid ah oo ku jira kutubka Falimaha Rasuullada oo ku caawiya fikraddooda khuseysa dhibaatooyinka oo deedna xoogga ayay saaraan ama carabka ayey ku adkeeyaan arrintaas inta badan dhacdooyin badan. Inkasta oo jiraan dugsiyo (Schools) casri ah oo kala duwan dhexdeeda kooxahan dhaqdhaqaaqyadooda – waxay ku baaqi doonaan in lagu hadlo carab (Luqad aan la aqoon waxay ay tahay.) Qaar waxey aaminsan yihiin rumeysadkaada aad ku heshid “Helidda” haddii aad haysatid xilliga qosolka qudduuska ah. Qaar kalena, si kasta oo ay ahaataba, waxey leeyihiin kuma hadli kartid carrabka, sababtao ah waxaa leedahay cilmi nafsi la xiriiira oo kor kuu haayo, oo haddii waxakani lagaa saaro carrabyada wey joogayaan mana siin kartid hadal ama tiraab. Halkani waa sharaxaad aan ahayn inta badan wax ku saabsan makhuurinta (Baabtiisamka) dabka uu safaynayo (Sida ku xusan dhacdadii hore ee heerka sare ee daahirinta Wesleyanka ahayd), ama mukhuurinta awoodda xoogga leh. Sida dhacda aalaaba markii laga eego habka heerkii sare ee Bentekolismk, laakiin, inta badan waxey ahaatay makhuurinta (Baptism) farxad lagu amaano khibrada buuxda. Waxaan u hadlayaa si guud, laakiin waxaan aaminsanahay sida saxda ah.

Midda Afaraad, waxaa jirta dhawr noocood oo ‘nolol sare’ waxbarashadeed. Waxeyna lahaayeen wax ay isaga mid yihiin: Si sahlan baad u badelentay oo si sahlan baad Masiix ula midowday, si sahlan baad mar labaad u soo dhalatay. Deedna dhibaataada baad isu soo dhiibtaa adigoo rumeystay oo Ilaah baad u tagtay, oo si hagaagsan baad ugu jirtaa nolosha Masiix. Caadi ahaan qaybaha hoose ee dhibaataada ayay tahay bayaanka guud ee oogada sare ee

carrabyada ama qosolka qudduuska ama qaylada xad-dhaafka ama boodboodidda, laakiinse, ugu dambayntii maxsuulka wuxuu noqon doonaa awood cusub ee ku noolaashaha nolol qudduus ah. Xoog saaridduna ka dhicidda ee dul-saaran awood wax ku qabashada iney inta badan ay tahay wax qabad fiican oo kuu geyneysa quduusnimada.

Midda shanaad, waxaa jira noocyo waxbarashadeed oo ay ku jirto middii hore ee duugga ahayd iyo midda casriga ah ee caanka ah oo wada arko. Waxeyna diiradda saartaa xagga caymiska, oo waxey soo dedejisaa xilliyada luqadda kitaabiga ee ku xirnaashaha Ruuxa Qudduuska. Qaar ka mid ah kuwii dhawrsanaa – sida aadka ahna ugu ad-adkaa anshaxa (Puritans) – Thomas Goodwin. Tusaale ahaan – sidan bay ahayd waxbariddii. Waxaana jira maanta wacdiyayaal si xoogan u rumeysan iney ku wacdiyaan sidaasoo kale, kuna celceliya goor walba. Waxaan ku fekereyno asal ahaan waa waxbariddaa, taasoo ku daba xigta dib u dhalashada iyo isbedelka xagga rumeysadakaaga. Waxaa jira dhibaatooyin khibradeed oo ku jirta markuu rumeystahaa galayo tayeenta cabirka cusub oo dhan walbaba ah ee xagga caymiska (Hubsashada) iyo ku xirnaanshaha Ruuxa (Qaar waxay yidhaahdaan makhuurinta – Baptismka Ruuxa iyo ku xirnaashaaha Ruuxa ayaa calaamad u ah). Maxsuuladan waa wax dhaldhalaal muuqda, xamaasadda cusubna mar bay noqotaa markhaatifur ruuxiyan ah oo qofkaa uu leeyahay iyo khibrad; laakiin sheyga cilladda ah ee ku saabsan qofkaasi waxaa weeyaan faa’idadiisa dhabta waxey ka timaaddaa ku xigidda ku xirnaanta Ruuxa Qudduuska.

Shantaa arimood ee aan kor ku soo xusnay waxaa ugu weyn ee ku xidhan waxbariddaa, waxoo idil qaybo waxbarashadeed oo yar yar baa hoos socda weliba. Laakiin, waxyaalahan dabaqyada ugu

waaweyn ee waxbarashadeed iney tahay khibrada dhibaata daysan ee daba socota isbedelka qofka iyo dib u dhalashadiisa labadaba lala ballamay iyo qaarna waxey leeyihiin, waa amar sida qalb daruuri oo ku jira ku noolaashaha nolosha Masiixiyiinta.

Waa maxay Qayb jabjabeedyada Guud ee Caadiga ah ee Ku Jira Waxbaridda

(1). Dib u dhalashada iyo isbedelidda/ Doorsoomida (Dadka qaar intooda badan waxey yidhaahdaan' aaminadda isbedelidda dhabta ah). Waxey ku dhaxal siisaa si wanaagsan inaad ugu noolaato nolosha Masiixiyadda si waafaqsan cilmiga Kitaabka Qudduuska. Waxabaridda waxey u dhigan tahay sidatan: 'Iminka Masiixi baad tahay oo waad badbaaday oo Ruuxa ayaa kuugu jira!' Waa hagaag! Laakiin haddii aad si dhab ah ugu noolaan kartid, noloshaa xarafka weyn ee L, ku noolow awood xoog iyo quwad leh, ku noolow ka guuleysiga nimcada, ku noolow ka faa'ideysiga, ku noolow xajinta kartida markhaadi furiddaada. Waxaa ku waajibay sarreyntan inaad ku ahaato in badan sharafta iyo darajo sare, oo ay in badana khibrada buuxda ee nimcada Ilaah. Haayoo, waad badbaaday, waan kuugu raacsanahay, laakiinse, doonistan ma aha mid si dhab ah kuhu samayneysa wax ka duwan ilaa aad gasho khibrado kale. Cusboonaanta isbedelka iyo dib u dhalashada wey la ekaan doontaa geerida, laakiin runtii ma dhisi doonto inaad ku noolaato, waxaad u baahan tahay khibrad dhibatooyinka.

(2). Khibradda ku daba xigta dib u dhalashada waxey tahay falkii tagay oo aad gaartay waxaad rabtay oo ay sal u tahay shuruudo gaar ah ama isticmaalidda micneysan.

Qaar baa dadka waxey baraan waxbarashooyin iyo cilmi odhanayaa khibradan. Khibraddaas waxey kugu timaaddaa dadka fal aan tagin laakiin, ahaanshaha. Sidaasi laga-yaabaaye, waxey tahay shaqadeenna aan ku arkeyno gaaridda waxa aan rabnay sida khibradda oo kale, oo ka daba oroddo la kulanka xaalado jira. Dugsi (School) walba waxaa u degsan xaalad u gaar uu u leeyahay, oo dugsi (School) kasta wuxuu leeyahay xaalado kala duwan. Laakiin xaal ay ka wada siman yihiin baa jirta oo xukuma khibradahooda oo fal taagan ah oo la arko ilaa ay ka gaaraan qaybaha qeexaya xaaladaha ay la kulmeen baa jira.

(3). Rumeystayaasha oo idil kuwa leh marka dambe khibradda wey garan doonaan, sababta oo ah wey ka diiwaan gelsan yihiin heerka dareenka garashada Masiixiyiinta. Qofkaa laga yaabee inuu la yimaado toobad iyo rumeysad ku xusan qaybtaas ah waxbaridda aadka u liidata ama faqriga ah. Labadaba korinta iyo xaqnimadaba iney yihiin caddeynta sharciyeed ee Ilaah, oo uu ku sameeyey isla wakhtigaa uu ugu liitay rumeysadka ku xidhan ballantii badbaadiyaha iyo badbaadada, taas oo ku jirta Isaga.

Waxaa si saafi ah u suurtagashay ragga iyo dumarkaba, wiilasha iyo hablahaba, iney u ahaato sida ugu badan ay isku xaqiijinayaan sida Rasuul Bawlos, oo ka sii badan sida korinta Augustiinkii caanka ahaa, sidaas oo kalena aan loo ogeyn ama looga warqabin waxbariddiisii saxda ahayd. Laakiin taasi waxay ayidsan tahay khibradda dhibaataada aqoonta odhaneysa in aysan tani ahayn sida ugu qotada dheer ama ugu fog ka walwalka dhibaataada. Iminka qodobkan ah Bentekostalkii hore wuxuu ahaa kan ugu axmaqsanaa, sababta oo ah waxey ku leeyihiin

rumeystayaasha wey caddahay cabirkiisa lagu saleeyo ee lagu garan karo inuu leeyahay taasi – wuxuu ku hadlaa Lisaan (Carrab) luqad aan la garanayn. Kuwa kale ayaa dadka waxaa bara oo aan inaba u aheyn wax qiil cabiraad u ah. Axmaqnimadaa wey ka koreysaa ereyo. Waxey dadka uga tagaan iyagoo leh, Waa inaad lahaataa khibradda haddii aan ahay Masiixi caadi ah oo taas lahayn. Runtii ma noqon karo Masiixi aan ku dhaaran karo ilaa aan yeesho taasi mooyaane.

Sideen ku garan karaa inaan leeyahay waxaasi? Laakiin taasi jawaabta asalkeeda oo ay bixinayaan dugsiyada (Schools) waxey leedahay waad garan doontaa taa iyada ah, sababta oo ah wuxuu ku diiwaan gareysan yahay ama ku qoran tahay garaadka caqligaaga.

(4). Waxbaridda waxa ka dmbeyya waa wax si gooni ah loola soo baxay oo hab su'aaleed loo isticmaalayo qaybo ka mid ah Qoraalka Qudduuska. Dhibaataada waxbarashaddeeda oo dhan waxey sheegtaa sal iney u tahay Qoraalka Kitaabka Qudduuska oo luqaddeeda waa mid loo isticmaalo kitaabi xajinayo arrimaha khibradda ku saabsan. Tusaale ahaan: Mid ka mid ah naxwooyinka jumladeysan ee inta badan Shibboleth kuna jirta – fiicnaanta Wesleyan waa 'Sifeynta/Daahirinta qalbiga' oo laga soo qaatay Falimha Rasuullada 15:9, 'Qalbiyadooda rumeysad buu ku nadiifiyey' Mowqifka guudna, siday doontaba ha ahaatee, waxey ka hadlaysaa ma aha wax ku saabsan shaqada labaad ee nimcada. Laakiinse, waxey ku saabsan tahay shaqada koowaad ee nimcada ee uu Ilaah ku fuliyey qalbiyadii Korneliyos iyo saaxiibadii. Mar kale, fikradda guud ee ku jirta dhamaan daahirsanaanta waxaa laga soo qaatay Tesalonikada koowaad: "Ilaaha nabadda qudhiisa qudduus ha idinka wada dhigo, oo ruuxiina iyo naftiina iyo jidhkiina dhamaan ha la wada ilaaliyo"

(1 Teselonika 5:23). Fikraddu waxey tahay ‘badbaadinta nolosha Masiixa’ aadkan loogu yaqaano nacam waxbaridda qaarkood sida ‘Nolosha Sare’ waxaana laga soo qaatay (Rooma 5:10) “Haddii, inteynu col la ahayn Ilaah inagula heshiiyey dhimashada Wiilkiisa, de si ka badan, innagoola heshiis ah, ayaynu ku badbaadi doonaa noloshiisa”.

Cilmiga barashada Ilaah oo idil ee dhibaato iska soo dhiibidda waa ineynu ku galno guusha nolosha ee ay inagu hagaeyso naxwaha ku jirta Kitaabka oo deedna noqda fal tagay oo la soo dhaafay xilligiisii micno ahaan, ‘Ku badbaadnay nolosha Masiix’. Sidaas oo kale, midka caadiyan jajabka hoose ee ku jira dhammaan dhibaata cilmiga barashada Ilaah fikradahooda nolosha Masiixiyadda. Taas baa u ah asalka lagu xushay su’aaleynta loo isticmaalo qaybo ka mid ah Qayb Qoraleedka ku jira Kitaabka Qudduuska.

Sidee baan ku garan karnaa in waxbariddan aysan waafaqsanayn qoraalka kitaabiga ah?

Ma jirto meel go’aamisay oo ku jirta Kitaabka Qudduuska in dhibaatooyinka soo foodsara Masiixiyiinta ama kaniisaddaba doodan xalinteeda xagga ka eegidda khibradda dhibaatooyinka.

- (1.) Bal ka feker dhibaata qaybsanaanta. Waxaa ka jiray xisbul ruuxi korintos. Qof baa akhbaar barakadaysan u soo diray Bawlos – reerkii Khalo – bay ahaayeen ‘Dadkii Khalo ayaa iiga kiin waramay in ilaaqi idin dhex taal!’ (Korintos 1:11). Bawlos wuxuu ku sharxay ilaaqdaa iney bayaan guud ahayn. Muxuu noqon karaa kacsiga sii

badanaya intii rumeystayaasha heli lahaayeen xisbul Ruuxi ah? Rumeystayaasha dhamaantood ‘Waxaa lagu babsiisay Ruux qudha iyo jidh qudha, oo dhamaan waxaa lagu lagu waraabiyey Ruux qudha’ (1 Korintos 12:13). Waxey leeyihiin caadiyan khibrad ku jirta Ruuxa Qudduuska. Mana jirto labo heer oo Masiixiyiin ah – waxaa jira un kuwo keliya badbaaday oo lagu baabsiisay Ruuxa; kuwa keligood badbaaday oo galay nolosha sare; kuwo qura oo siyaado lahayn iyo kuwa dab lagu baabsiisay. Ma jiro hadal guud mar ah oo ku jira warqaddan oo khibrad labo nooc ah ka hadlaysa. Bawlos kaniisadda wuxuu u qoray ‘Lagu daahiriyeey Masiixa’ taas oo odhanaysa, ‘Dhexdiina waxaa ka jirta iskala qaybin.’ Wuxuuna ku sharxay kala qaybsanaantan. Rumeystayaasha qaarkood waxey leeyihiin waxaanu nahay kuwa Bawlos, qaar Butros, deedna runta kuwii Ruuxig ayaa yidhi, ‘Waxeynu nahay Masiixiyiin, Masiixiyiin dhab ah, waxaannu raacsan nahay Masiix keliya.’ Laakiin Bawlos wuxuu dhigay isla meeshaasi ay dhigeen raggaasi.

Sidee buu Bawlos ula tacaalay arrinkaa? Ma wax uu yidhi taasi waa caddeyn markhaatifur baan u hayaa sababta keentay kala qaybsanaanta iney tahay weligood laguma baabsiisin Ruuxa, oo aysan weligood aysan xajinin waxa ay tahay iney sifeeyso dembiga ku hoos duugan? Muxuuse siiyey sida ama ugu deeqay iyaga sida daawada ka hortagidda lidka suntan ee gunta hoose u fadhida qalalaasahan dhibaatadeeda ee iskala qaybinta? Mana uusan ku odhan iyaga horey u socda wax sii badan baad heleysaane. Halkii uu kula murmi lahaa iyaga iney xajiyaan runta ay ogaayeen kolkii horeba oo markii

horeba ay heysteen. Wuxuuna ku yidhi ‘Masiixa ma qaybsamaa?’ ma waxaa la idinku baabtiisay magaca Bawlos? Wuxuuna si waadax ah u tusay iyaga iney fahmaan oo ay xajiyaan waxa ay horeyba ay u heysteen oo horeyba ay u ahayeen. Shaqada dibadda waxa ay heystaan iney tahay kala qaybsanaantaa dibadda uga saari doonto. Waad aragtaa iskala qaybintaa? Ma uusan odhan, ‘Waa inaad wax siyaado ah heshaa’; wuxuu yidh, ‘Waa inaad fahamtaa oo si quman u garataa wixii horeyba aad u heysatay ee ku jirta Masiix.’

(2.) Dhibaatada fiqsiiga Bawlos warqaddiisii daaha waxay ka qaaday in qaar ka mid ah Masiixiyiinta reer Korintos ay sineysteen oo ay ku nool yihiin meel aad u xun oo hooseysa khibradda Masiixiyiinta, oo ay u baahan yihiin kaalmo, haddii un mid falo dabna lagu baabtiisay oo ay ka daahirisay dabcigii dembiga. Xitaa faraqa waxaa ugu xirnaa dad xunxun oo dhilooyin ah, suuragalna ay tahay iney macbudka ka dhileysan jireen. Haddaba sidee buu Bawlos ula tacaalay dhibtan aadka u xun ee laga argagaxo? Wuxuuna u qoray ‘Cuntada waxaa loo sameeyay caloosha, calooshana cuntada, laakiin Ilaah baabi’ in doona tan iyo taaba. Jidhka looma samayn sinada ee waxaa loo sameeyey Rabbiga, Rabbiguna jidhkuu xanaaneeyaa. Ilaah waa sarakiciyey Rabbiga, innagu xooggiisa ayuu inagu sarakicn doonaa. Miyaanad garanayn jidhkiinu inii yahay xubnaha Masiix? Haddaba miyaan qaadaa xubnaha Masiix oo dhilo xubnaheeda ka dhigaa? Yaanay noqon. Miyaanaydin inuu kii dhilo raacaa la jidh yahay, waayo, Ilaah wuxuu leeyahay, labaduba waxy noqon doonaan isku jidh. Laakiin kii Rabbiga raacaa waa la Ruux. Ka carara sinada, dembi kaloo kasta

oo nin falo, jidhka waa ka dibadda, laakiin kii dhilanimada falaa jidhkiisuu ku dembaabay. Ama miyaanaydin ogayn jidhkiinu inuu yahay macbudka Ruuxa Qudduuska ah ee idinku jira ee aad Ilaah ka hesheen? Oo idinku isma lihidin, waayo, qiimo weyn baa laydinku soo iibsaday. Sidaa aawadeed Ilaah jidhkiina ku amaana.’ (1 Korintos 6:13-20). Sow ma aragtid waxa uu samaynayo Bawlos? Inuu wajahayo qodxaha culculus ee dhibaatada, anshaxa weecsan ee ka duwan, mana go’aansan isaga waxa ay dadka Korintos u baahan yihiin qiimeyntooda tayo ee khibradda cusub ee nimcada. Mana uusan odhan, waxaad u baahan tihiin babsiiska Ruuxa in la idinka sifeeyo/daahiriyo karaahiyadan aadka u xun, wasakhda hordhaca murugada dhillinimada ah. Halka uu ka yidhi ‘Miyaanaydin garaneyn ...?’ Ka feker waxad adigu tahay, ka feker xidhiidhada ee markii hore aad heshay markii aad toobadkeentay ee aad rumeysatay ee laguugu yeedhay la midowga Masiix. Taas bay ahayd midowga dhabta ah; la qaybsashada nololaha Ciise Masiix. Miyaadan garaneyn in taasi tahay midowga dhabta ah? Marka aad aadayso guri dhilo inaad aadayso midnimada Masiix isla kolkaa, sideyse isu qabataa? Ma u qaadi kartaa xubnaha Masiix oo ka dhigi kartaa xubnahaha sharmuutada? Miyaadanse garaneyn jidhkaagu inuu gorgortan lagu soo iibsaday? Oo qiimo ku fadhiyo? Markii Ciise lagu gowracay oo uu dhintay, markii uu ahaa kii farahmay oo ay ku dhacday cadhadii bani’aadmiga iskutallaabta dusheeda. Wuxuu ku dhintay iibsashadaada. Gacmahaaga, lugahaaga, xubnahaaga taranka waah anti la soo iibsaday. Oh! Reer Korintosow, miyaadan xaqiijisan taasi, mise ma garnaysid baa? Mar keliya ma uusan sameyn sidaa Rasuulka se wuu go’aansaday, taas oo sabab ay u ahayd sababta reer

Korintos ugu noolaayeen wixii ay sameeyeen waxey ku waayeen qaar ka mid ah khibraddii dhibaataada. Wuxuuna ku yidhi, waxa halkan ka muuqda calaamad weyn oo aad kula midowday Masiix. Ruuxa ayaa kuugu jira, waa lagu soo iibsaday. Laakiin waa inaad ku noolaatid wax aka baxsan dembi ku lug yeelashada ama hadal aan dhab loo muujin, oo aad horeyba yaalay, iyo wixii aad horey u haysatay. Waad akhrin kartaa dhamaan warqaddii koowaad uu Rasuul Bawlos u qoray kaniisaddii Korintos iyo dhibaatooyinkeedii ka taagnaa kaniisadda, oo ka waramayeyn iney ku soo noqnoqanaysay markale iyo markaleba. Waxaa kaaga soo bixi doona xoogag adag oo ku jira warqadaha kitaabka Axdiga Cusub. Aniga kuma odhanayo rumeystayaasha ma laha khibrad ruuxi ah oo dhibaatooyin; taasi waxay ka hor imanaysaa labada waxbarid ee kitaabiga ah iyo caddeynta taariikhda waayaha ee Masiixiyiinta. Masiixiyiintu waa khasab iney dhibaatooyin wajahaan, oo qar ka mid ah dhibaatooyinkaa ay u keeni karto wakhti yarna iney ka hoos uga dhacdo heerka Ruuxiyadda dhabtii oo xoog aysan weligood garan karin – intii hore. Kumana doodayo sidaasi! Waa u doqonimo kuwa ku odhanaya ama sheeganayo in ay weligood Masiixiyiinta la kulmeynin dhibaatooyin. Waxaan leeyahay waxaa weyaan in Kitaabka Quduuska aysan ku xusneyn meel amarro iyo ballan qaadyo xagga dhibaatooyinka Ruuxa nooc walbaba ha ahaatee ee khuseysa nolosha Masiixiyiinta aysan jirin. Waxaa jira duni kala duwan oo u dhexeysa labadaa waxyaalood. Waxaad si toos ah aad u aadi kartaa Kitaabka Qudduuska qaybtiisa Axdiga Cusub oo kuugu wargelinayo sidii dhibaatooyinka oo nooc walba ah kor loogu qaaday. Ugu yaraan xeerka ay ku jirto dhibaatooyinka anshaxa guud,

dhibaatooyinka akhlaaqeed, dhibatooyinka ku dhex jiridda dembiga, dhibaatooyinka xidhiidhka, adiga kaa dhaxeeya, dhibaatooyinka dunida iyo jidhkaaga. Laakiin ma dhigi karto, weligeed, weligeedba, ama ma qoraaladii Rasuulada ayaa amray ama ballimayey khibradda dhibaatada iney micno la mid tahay jawaabtii Ilaah ee dhibaatooyinkan. Deedna maxaan ka odhan karnaa ama ugu yeedhi karnaa ‘Afarta bentekostal’ ay sheegeen Fallimaha Rasuulada cutubka 2, 8, 10 iyo 19aad? Inagu ma sharxi karno qaybaha ku xusan halkan, laakiin qalbiyan waa codsi, waayo, kuwa runtii daacadda ay ka tahayba imaatinka xoog u qabsadashadooyinka waxa ay barayaan. Akhrinta F. D. Bruner’s waxtar buu leeyahay buuggaa, waa ‘*Cilmiga barashada Ilaah ee Ruux Quduuska*’ (Grand Rapid 1970). Waxaa jira meel ama laba meel oo ku jirta buuggan Bruner’s meesha aragtida Berithian ee qoraalka kitaabiga ah ka imanaysa. Nooca aragtiyadaa ma heysto aniga, weliba wuxuu soo qaatay qaar loogu yeedho hubsashada xaqiijinta aragatida baabtiiska – qaar inaga mid ahna waxey u yaqaaniin sacramental view – laakiin labadan kala goonida ah ee ka socda cilidahan. Bruner’s wuxuu ku sharxay labdan qayb qoraaleed ee ku jira Falimaha Rasuullada oo uu ah fure buuxa. Badanaa inta aan ka walaacsanahay waxa inaga siinayo waxyaabaha aan caqligalka ahayn ee uu ku macneeyey runta ku dhex jirta. Aniga ma lihi Masiixiyiinta yey tukan oo aysan salaadin oo lagayaabaa beritoole ayay awood buuxda oo Ruuxi ah u yeelan doonaan inta ay ahaan lahayd maanta. Maya! Inta badanaa aan wax la karaahiyesto ay dhamaan tahay una ahaato dhamaan dhibaatadan waxbarasheed waxey horseedeysaa jahwareer iyo dacwado badan, aamin bixid ama daneystinimo iyo xamaasad leh oo weliba aniga

waxaan inkaarayaa ruuxa La'odicea -hodanimo, alaabtana ugu badanayso, waxbana loo baahnayn' kolba inta aad leedahay, "Waan ku haysanaa waxwalba Masiix; gadaal bal aannu u fiirsanno ----" Ruuxaasi meelna inagama barayo Kitaabka Qudduuska. Inkast oo aanu la midownay Masiix, waa nala barkadeeyey oo Baraka kastaa oo Ruuxa ka timid ee ku jirta meelaha janada' (Efesos 1:3). Waxaanu nolosha wakhtigeena ku bixinaa sida ku haboon xitaa dactalada barakooyinkaasi sida ugu fiican ku haysanaa keliya qaan bixintii; ku timaaddo sida ugu badan, Ilaah wuu karhaa ruuxyada kala duwan; sababta oo ah wey ku badan tahay, ugu korodhaa alaabaha, waxbana u baahna, Sayidkeennu wuxuu yidhi, ' Waxaan ahay wax ku saabsan inuu idin matajiyo' Mar walba waxaanu u barinaa inuu aad inoogu qaybiyo Ruuxa. "Haddaba idinka oo shar leh haddaad garanaysaan inaad haddiyado wanaagsan caruurtiina siisaan, intee, intee ka badan ayaa Aabbihiiin janada ku jiraa Ruuxa Qudduuska ah uu siin doonaa kuwa Isaga weyddiista?" (Luukos 11:13). Warqaddii Efesos, Bawlos wuxuu ku qoray 'Ammaani ha u ahaato Aabbaha Rabbigeena Ciise Masiix, inagu siiyey barako ----' Haddaba waxaa ka jira cilmiga barashada Ilaah wax la yiraahdo ammaan siiba gabay ama maqaal ammaan ah oo Isagu ku ammaanay saddex-midnimada Ilaah ee ku jirta badbaadada weyn, doorashada Ilaah, oo Aabbuhu horey idiin doortay sida ay tahay nimcadiisa, Wiilkuna idinku soo furtay nimcadiisa, Ruuxana laynagu dhejiyey ilaa maalinta furashada. Weli wuu sii socdaa ilaa aayadda 15aad oo ina leh 'Sidaa awgeed Ilaah baan idinkugu mahad naqaa, baryadayda ayaan jilbaha u dhigaa, in Ilaah idin siiyo Ruuxa xigmadda iyo muujinta idinku siiyo aqoonta aad Isaga taqaaniin, io waxa ay tahay

hodantinimadeeda ammaanta dhaxalkiisa eek u jirta qudduusiinta., iyo waxa ay tahay weynaanta xooggiisa aan la koobi karin.’ Wuxuu yidhi: ‘Waad heysatan waxyaalahan oo dhan, laakiin waxaan Ilaah ka baryayaa inaad u heysataan si qoto dheer, hodantinimada dhaqan gelinta aqoonta ee dhammaan ku heysataan Masiix iyo Masiixaasu idinku dhex jirao’ Habase yeeshee haddii ay intaasi idinku filneyn, cutubka 3aad wuxuu ku yidhi ‘Waxaan ugu jilba joogsaday’ Deedna sidaa buu Ilaah ugu baryey isagoo leh, ‘Ilaah inuu idin siiyo itaal aad Ruuxiisa kaga xoogeysataan xagga gudihina, inaad gartaan dhererka iyo balaadhka, hoos iyo korba, oo aad garataan jacaylka Masiixa idin siiyey aqoonta, iney idinka buuxsanto kaamilnimada Ilaah oo dhan.’

Bawlos ma uusan u baryin in kuwaa iyaga ah heystaan nooc gaar ah khibrad suufinimo ah (Chrismatic experience); Mana uusan u baryin iney kuwaasi helaan shaqada labaad ee nimcada; Mana uusan u baryin iney helaan inaba wax ka mid ah shanti qaybood ee khibrada ee aan idiin soo sharaxnay, laakiin wuxuu u baryey in ay heli doonaan ama haysan doonan in badan awoodda, ay ku balaarineyso garashada Ruuxiyadda, iyo korsiiimaha Ruuxiyadda ku haboon kaamilnimda ku jirta Masiix. Kitaabka Axdiga Cusub inaguma amrin inaan eegno, ama laynagula ballamay midna khibradda dhibaatooyinka wax ku daba xiga dib u dhalashadeena iyo badbaadadeena. Wey dhacdaa barid la siman oo bayaan u ah, baahida, oonka, neeftuuridda, hilow, tuugid, boholyoobid dheerasho ah, dalbasho, horumarid, waxaasi waa dabecadda caafimaad qabka nafta. Waxaa jira wakhtiyo kolkii aan rajo dhigo oo aan odhan jiray, ‘Rabbiyow suurta geli in aan kari karno xitaa inaan aragno dadka taaba

gelinta xoog saaridda Kitaabka Qudduuska?’ waxay iigu muuqataa in dadku ay ka baxaan gacanta oo ay kulligood galaan dhibaatooyinka Masiixiyiinta, ama xoog tamar kale oo wada ay ka baxdo waa waxba-yahay, nolol la’aan, wax aan la tijaabin, isku qasid, nooc qabow oo Masiixiyeed. Waa wax murugo leh, inta badan xoojinta magaca (Dib u curashada) - (Reformed) – (Dib u habaynta). Si furan oo waadax ah haddii aan u hadlo waxaan ka doorbidi lahaa inaan lahaado wadne diiran, madaxana dhogor u saaran tahay ‘Wesleyan’ oo ku fikira inuu u baahan yahay oo uu heysto shaqada labaad ee nimcada. Laakiin kan ay baahida u heyso Ilaah, deedna qofkaa saacado badan meel fariisan karo oo ku caddeeyo ineysan jiri karin waxyaalahaas, oo qalbigiisu yahay mid sida dhagaxa u qabow.

5. EDBINTA ILAAHIYANTA AH

Meel looga baxsan karo ma jirto edbinta Ilaahiyanka ah ee xaqqiida ku dhex jirta nolosha Masiixiyadda.

Qoraaga Kitaabka Cibraaniyadda wuxuu hoos ka xariiqay qodobadan: ‘Waxaad Ilowdeen waanada idiinla hadasha sida wiilal oo kale, wiilkeygiyow, ha fududeysan Rabbiga edbintiisa, hana itaal beelin kolkuu ku canaanto. Waayo, ka Rabbiga jecel yahay ayuu edbiyaa, wuuna karbaashaa wiil walba oo uu aqbal. U adkeysta edbinta. Ilaah wuxuun idinla macaamiloodaa sida wiilal oo kale; waayo, waa wiilkee kan aannu Aabbihii edbin? Laakiin haddaan laydinku edbin edbinta laga wada qayb galo, haddaba waxaad tihiin garacyo, oo wiilashiisa ma ihidin.’ Ha iloobin weligaa in qorshaha Ilaah yahay madaxfurashadaada rahmad lagaa rabay oo kaa dhigtay Quduus, ha ku farxin “Waayo, kuwuu horey u yiqiin wuxuu haddana horey ugu doortay

iney u ekaadaan suuradda Wiilkiisa, inuu Isaga curad ku noqdo walaalo badan dhexdooda.” (Rooma 8:29).

Wax badan oo farxad ah baa jira oo inala socda, laakiin qaybtan waxey inoo sheegtaa ‘ineysan jirin shax miiseed jaro ka boodo ah oo inagu farax muujineyso’ Anigu weligeey marnaba barida kama dharbaaxin caruurtayda oo deedna waxaan u ogalaadayiney igula cayaaraan jikada dhexdeeda ee aan cunada ku karsano. Ma jirto shax miiseed meel xaadirmimada farxad gelin. Aragtidan, bal haddii aad heysatid nooc khibradeed oo aad isticmaali kartid. Haddii aad heysatid caddeyntan balaaran soddon iyo labo ilkood oo ka baxsan afar iyo labaatanka saacadood, waa inkaar nacalad ah oo heysata qolada suufiyiinta xamaasadeysan ee Chrismaticska ah! Laakiin, waxaa in a caawinayo waa urka caagadaeysan markaanu xabad saaridda shax miiseedka caruurta Ilaah ay u yimadaan khadhaadhka nafta? Uraaxeeyntii ayuub oo kale qaado, oo waxaad tidhaahdaa, ‘alla dhibaataadu waxey tahay, ma haysatid Ruuxa Qudduuska. Haddii aad mar un ku hadli lahayd luqadda aan la garaneyn ee carrabka liisaanka, waxaad aadi lahayd qolka dabaqa sare iyo hadalka hantaacada ee aan ulajeedada lahayn ee isku dhex yaacsan saacad qudha, oo ay dareemaan fiicnaan. Taasi ma aha muuqaal buunbuunis ah. Waxaan maqlay nabi Ayuub saaxiibadii iney taladii dadka siiyeen isaga. Taas oo iska soo horjeedda. Halkan xeer baan kuugu hayaa aad ku qorto qalbigaaga: Ilaa laguugu sameeyo daahirnimadii u ekaanta Ciise Masiix waxaad u soconeysaa ama rabitaanku ahaanayaa dareenka bakheelnimada falkii tagay ee Ilaah.’ Shax saaridda eryasasho dank u jirtaa ma jirto wakhtil xaadirkan u muuqda farxaddaada. ‘Kan uu Ilaah jecelyahay laabta ayuu saaraa’ ‘In alla inta aan

jeclahay waan canaantaa oo edbiyaa, sidaas daraadeed qiiro yeelo oo toobad keen.’ (Muujinta 3:19). Waxaan ku leeyahay marka uu Ilaah ku cnaanayo ma aha un xagga oogada korkeeda saameynteeda, inaguma waajibin inaan aragtida canaanshaha iney u gaar tahay xagga oogada jidhka iyo cimilada dhaqaaleed. Laga yaabe inaan la canaanin, ama lagayaabee in la edbiyo. Anigu canaanta iigu daran waxaa weeye in laga iga soo baxsho oo la iga saaraba Rabbiga xisabtiisa; Marka aad tukaneyso ama aad Ilaah baryeyso oo aadan lahayn dareenka xaadirnimo ee Ilaah oo aadan xaqiisanayn weheshiga wada jirka Ilaah. Maxaa canaansho ah ka khadhaadh oo ka jirta meeshaa run ahaanshaha maanta Ilaah ku jira, wada jirka farxadeed iyo baryada? Waan garanayaa taa iyada ah! Taasi waa mid ku filan Masiixi kastoo raadinaya qalbigiisa oo leh ‘Ilaahayow meesha aan kaa calool xumeeyey adigu, ha iga sii jeedin wajigaaga?’ Ha iga qarin wajigaaga walaacayga dartii. Kor iigu qaad iftiinkaaga aan i xisaabineyn. Sabuurada waxaa ka buuxda waxbarid buuxda. Ilmaha Ilaah, wuxuu waxuu wajahaa xaqqiida oo ma laha mana jirto meel looga baxsan karo ciqaabta Ilaahiyanka ah sida ku dhex cad nolosha Masiixiyiinta.

6. HABKA MICNEYNTA NIMCADA

Waxaa jira saameyn bedelaadaha ku saabsan ee loo doortay habka micneynta nimcada eek u kobceysa ama ku hormarayso nolosha Masiixiyadda. Habka micneynta nimcada waxaan u kala saari karnaa laba qaybood: (1) Mid shakhsiyeed iyo mid gaar ah. (2) Mid dadweynaha u dhaxeysa oo waqaf ah iyo mid bulsho.

- (1) *Midda shakhsiyeed iyo midda gaarka ah.* Waanu naqaanaa waxa midda shakhsiyeed iyo ta garka ah micno habka ay u dhigan tahay nimcadaa waxa ay tahay. Baryadii Ciise sidan bay ahayd, ‘Iyaga Qudduus kaga dhig runta, hadalkaagu waa run e.’ (Yooxanaa 17:17). ‘Bal nin dhalinyara ah muxuu jidkiisa ku nadiifiyaa’. ‘Waxaan Ereygaaga qalbigeyga ugu keydsaday si aanan kuugu dembaabin’ (Sabuurada 119:9, 11). Baryada qarsoon! Baryadu waa wax qarsoon oo qurux badan, oo weliba waa fursad farxadeed! Halkan waxaa yaala hal shey oo muhiim u ah waxa sababay daciifnimada ruuxiyeed: ‘Waayo, ma aad weyddiisataan’ (Yacquub 4:2). Maxay tahay sababta ay dadka ay u soo food saaraan dembiyada? Ma aadan weyddiisan. Ma aadan ku keenin dembiyada baryada dhiigga Masiix oo u gudbay Masiix, oo la yimid xoogga Ruuxa ee Masiix. Haddii aad u doondooneyso waad arki doontaa dembiyadaada kuugu keydsan ee xoog u xajinta kaa lumeysa.

Waxaa jira saameynta bedelaadda ku saabsan oo loo doortay habka micneynta nimcada ku koreysa nolosha Masiixiyiinta. Soonka ku xajji midda cibaadada gaarka ahaaneyd micno – baryo, ka fiirsashada Ereyga Ilaah, isbaar adiga qudhaada marka ay suura gal kuu tahay, lga yaabee, xilliyada af-xirka (Soonka). Adiga oo leh ‘Maya’ ku sharciyee oo khasab kaga dhig hamuunta jidhka dhibaataada dhexdeeda adoo ku jira markii ay u baahato naftaada oo ay dooneyso iney hor tagto wajiga Ilaah. Ilaalinta dhiigga waxey mayrtaa qalbiga iyo garaadka caqliga. Muhiimadda bawlos iyo muhiimaddaada waa siku mid; ‘Tan ayaan ku dadaalayaa inaan had iyo goorba qabo qalbi aan xumaan u keenin xagga Ilaah iyo xagga dadkaba’ (Falimaha Rasuullada 24:16).

(2) *Isutagga habka micneynta nimcada*: ‘Oo waxey ku sii adkeysteen rasuuladu, waxey bari jireen iyo xidhiidhka, tukasho, iyo kibista jabinteeda iyo tukasho’ (Falimahan Rasuullada 2:42). Xidhiidhka tukasho, wadaagidda nolosha! Haddii ay jirto meel aad si dhab ah uga dareemi karto qalbiyan nabdgeylo dunidan dusheeda waa ku dhex jirkaama la joogidda dadka Ilaah. Kullanka wada jirka ma aha keliya isla wada fariisadka kuraasta. Hooska darsadda maalintaa un. Kullanka wada jirka waa nolol qaybsashada walaalaha dhexooda ‘Yaa garanaya waxyaalaha ninka ku jira Ruuxa mooyaane’ (1 Korintos 2:11). Sidee baan u qaadi karaa culaabtaada, haddii aadan adiga iska rogin xaggeese ayaan ku arkayaa iyaga? Qoraalka wuxuu leeyahay, ‘Midba midka kale culaabta ha u qaado, oo sidaas ku oofiya sharciga Masiix’ (Galatiya 6:2); ‘La ooya kuwa ooyaya’ (Rooma 12:15). Sidee baad ku dhamaystiri kartaa in haddii aad tahay nacas un ma hadalka dareenka kacsiga ee bushumaha dushooda? Bal i tus meesha uu Ereyga ka yidhi ina tus bushumaha dushooda? Ma jirto meel sheegeys! Masiixyiin badan waxay la laab kacaan baabidda sababta oo ah kama tirsana bulshada oo ka gooni bay ka yihiin. Marka ay ku habooneyd inay la ooyaan, waa iney la ooyaan, oo ay walaalahood la ooyaan iyaga! Waxaan ka shakisanahay qaar ka mid ah kuwa ugu saameynta badan la taliya wadaadada iney imaadan, afkeygana aysan ka soo bixin laakiin illin baa iga soo dareerta marka aan la fariistay walaalo gabdho iyo wiilalba leh oo ooynta oo aan ka tirtiro illinta iyaga. Oo ay tahay waxa keliya ee aan u samayn karo. Xanuunkooda waa wax aad ii taabtay ku gaaridda erayo un. Taasi waa kullanka wada jirka.

Laga yaabee, Ilaah inuu inaga caawiyo salaadda/baryada, oo uu ka shaqeeyo inaanu aragno kaniisado

samaysmay meelaha dadku ka daba cararaan suufiyiinta (Charismatiska) sababtoo ah ugu yaraan waxey inoogu muuqataa inkastoo ay heystaan qaar ‘ku dhacay’ Diin! Waxey ila tahay inay halkaasi jago iiga banan tahay, haddii ay jiraan qaar isugu yeedha ‘Kaniisadaha Dib u Curashada’ ‘Reformed Churches’ inaan ku biro. Dhaxanta daran mar waxey gashaa lafaha sida dhulka sare ee taagagga buuraha dushooda ku yaala hawadeeda tahay.

Ha ooynin indha adayg ama ku diirasho, waayo, waa inaad cabataa dhammaan qaab dhismeedka kuu keeni karo hoos inaad ugu dhacdo darbiyadeeda. Micno aniga ugalama jeedo suuradda ama maqaalada buunbuuniska waxa ay tahay khibraddeyda aan heysto, laakiin waa run. Waqafka dadweynaha u dhaxeeya micneyntiisu nimcada ee Ilaah inagu siiyey kaniisadda xanaaneynteeda, jacay, oohin, farxad, adeegid, wacdinta jidhka Ilaah ee dadka.

Middan gaarka ah iyo midda dadka u dhexeysa ee micneynta u doorista micnooyinkeeda. Ma jirto wax saameyn bedelaad ah oo ku saabsan iyaga adeegooda dhabta koritaanka nolosha Masiixiyadda.

MERF – Grace & Truth Radio Ministry Translated!

www.somalforchrist.com

Email Contact: grace_trth@yahoo.com

AO

